


Bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa waxay khatar weyn ku yihiin caafimaadkeena

Isticmaal kasta ee qalajiye/antibiyootika waxay keentaa iska caabbin dawo. Ayadoo la isticmaalo qalajiye/antibiyootika markii run loogu baahdo baan ku joojin karnaa bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa ee soo kordhaysa.



Ma rabtaa inaad sii ogaatid wax intaa dheer?



www.1177.se



www.antibiotikaellerinte.se



www.skyddaantibiotikan.se

Goormuu qalajiyuhu (antibiyootikada) waxtar leeyahay?

Qalajiyuhu waxtar ma leh marka laga hadlayo

caabuq (ekfashin) cunaha ah oo fudud
hargab
burunkiito
qufac iska caadi ah

Wuxuu saammayn aan la hubin waxtarkiisa leeyahay marka

markii dhegaha caalir (dhego dilaac) uga dhaco carruurta da'doodu u dhexayso 1-12 sano
caalirka sanqada ku dhaca

Waxay khafiifin kartaa astaamaha cudurka lagu yaqaan marka laga hadlayo

caabuqa (ekfashinka) cunaha ku dhaca
caabuqa (ekfashinka) kaadimareenka

Waxay yarayn kartaa jirrooyinka ka dhalan kara marka laga hadlayo

caalirka dhegaha (dhego dilaac) ee ku dhaca ilmaha murjuca ah
caabuqyada (ekfashinada) boogaha qaarkood

Waa in la isticmaalo marka laga hadlayo

caabuqa (ekfashinka) ka dhasha qaniinyada shilinta
caabuq (ekfashin) galmada lagu kala qaado (Klamydia)
iyo jabtada

Noloshay badbaadisaa marka laga hadlayo

caabuq xun oo dhiiga raacay oo jirka oo dhan ku faafay
qoorgooye
caalirka sambabada ku dhaca
caabuqa ku dhaca qaybta sare ee kaadimareenka oo kelyaha
saameeya

Waa inaan isku caawinno inaan yarayno isticmaalka qalajiye (antibiyootika) ayadoo aan loo baahnayn
- Si dawadu waxtar u yeelato markii run loogu baahdo

Iska ilaali inaad naftaada iyo tan dadka kaleba cud-ur qaadsiisid, adigoo kaga hortagaya inaad....



markasta gacmaha iska dhaqidid xilliga cuntada ka hor Iyo gelidda musqusha kaddib



ku qufac oo ku hindhis gacanta meesheeda godan ee xusulka ku aadan



isticmaal waraaqaha sanku la iskaga tiro

Dhowr talo oo fudud markii hargab/duray kugu dhaco:




Madaxaaga kor u qaad markaad seexanasid



Biyo badan cab



Isticmaal dawada sanku lagu buufiyo, xanuun baabi'iyey iyo daawooyinka qandhada yareeya haddii loo baahdo



Iska ilaali waxyaalaha kuu keenaya istaxalujinta badan